



Qiimaha shahaadada xuquuqda shaqada ee qofka magangalyoddoonka ah waxbaa iskabeddelay laga bilaabo 1.1.2020

Qiimaha codsiyada shahaadada xuquuqda shaqada ee Waaxda socdaalka kor ayuu u kacay laga billaabo 1.1.2020. Haddii aad dalbanayso shahaadada xuquuqda shaqada ee qofka magangalyoddoonka ah, waxaa shahaadadaas qiimaheedu uu yahay haatan 50 yuuro.

Qiimaha lacagta falanqaynta ee Waaxda socdaalku waa kuwo ku salaysan nidaamka wasaaradda arrimaha guduha. Isbeddelka qiimaha lacagtu waxaa uu sidoo kale saamaynayaa dhammaan codsiyada kale ee shahaadada ([todistuspyyntöä.](#))

Haddii aad tahay qof magangalyoddoon qaxooti ah ama aad tahay shaqo siiyaha qofka codsada ah, aadna doonayso shahaadada xuquuqda shaqada, waad codsan kartaa shahaadada xuquuqda shaqada. Waa in aad codsiga shahaadada ku soo lifaaqdaa rasiidka ama wixii kale ee caddayn u ah, in kharashkii falanqaynta arrinkaas la bixiyay.

Rasiidka ama caddaynta kale ee kharash bixinta waxaa noqon kara:

- Rasiid ay ku caddahay in kharashkii la bixiyay.
- Caddaynta kaarka amaahda, oo ay ka muuqato in lacagtu ay akoonka ka soo baxday.
- Warbixinta akoonka (tiliote), oo ay ka muuqato in lacagtu ay akoonka ka soo baxday.

Shahaadada waxaad ka codsan kartaa Waaxda socdaalka

Shahaadada xuquuqda shaqo ee qof ahaantaada magangalyoddoonimo, waa in ay tahay mid waqtigeedu shaqaynayo marka aad qabanayso shaqo mushaar aad ku qaadnayso. Marka aad shaqada raadsanayso, waa in aad iska hubisaa, in shahaadada xuquuqdaada shaqo qabashadu ay billaabatay, walina ay shaqaynayso oo waqtigeedu uusan dhicin.

Haddii aad doonayso shahaadada xuquuqda shaqada waxaad foomka codsigaas ka buuxisaa bogayaga internetka. Hagista ama filmaan-bixinta ku saabsan dalabka shahaadada iyo qaabka kharashka loo bixiyaba waxaad ka heleysaa bogayaga interentka ee cinwaankiisu yahay: [migri.fi/todistuspyynnot](#)

Shahaadada waxaad ku heleysaa si dhakhso ah, markii aad codsiga qaab elektoroonig ama qoraal ahaan ugu soo gudbiso Waaxda socdaalka. Haddii aadan codsigaaga ku soo gudbin karin qaab elektoroonig ah, waxaad codsigaag keeni kartaa barta adeegga.

Sannadkaan 2020 waxaa codsiyada shaqada la keeni karaa barteenna adeegga xilliyada soo socda:

- Barta adeegga Käenkuja ee Helsinki, khamiis walba inta u dhexeysa 8-16.15 (laga billaabo 23.1.2020)



- Baraha kale ee adeegga waxaa la keeni karaa xilliyada ay furan yihiin, iyadoo la qaadanaayo lambarka door sugista (vuonumerolla)

Shahaahada xuquuqda shaqo waxaan kuugu soo diraynaa cinwaanka aad u soo gudbisay Waaxda socdaalka ama xeradaada qaxootiga. Shahaadada lagaama siinayo barta adeegga.

Warbixin dheeraad ah

- Xuquuqda shaqo qabashada ee qofka magangalyoddoonka qaxootiga ah:
migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus
- Hagista ama filmaan-bixinta ku saabsan samaynta codsiga shahaadada:
migri.fi/todistuspyynnnot
- Kharashka falanqaynta ee Waaxda socdaalka iyo warbixinta la xiriirta bixinta kharashka: migri.fi/kasittelymaksut-ja-maksaminen